Maad ku qanacsan-tahay go'aanka?

Haddii aadan ku qanacsanayn go'aanka
caawimada marka la eeg cutubka 4 1, 3§§
Sharciga adeeega buulshada, waad ka dacwoon kartaa.
Dacwada waxa la qorayaa sadex sbuuc gudahood marka laga bilaabo maalinta aad heshay go'aanka.
Dacwada waxaad ku sheegaysaa go'aanka aad ka dacwoonaysidiyo wixii aad doonaysid in la badalo.

Warbixin kale:

WWW.VAXJO.SE

WWW.SOCIALSTYRELSEN.SE

WWW.KONSUMENTVERKET.SE

VÄXJÖ KOMMUN
Arbete och välfärd
Box 1222, 351 12 VÄXJÖ

Ciwaanka booqashada iyo telefoon lambarka

XARUNTA QAABILAADA
■ Willans Park 3, 2nd floor
Reception, tel 0470 - 433 00
Fax 0470 - 79 69 47

XARUNTA DHALINYARTA
■ Willans Park 3, 2nd floor
Reception, tel 0470 - 433 00
Fax 0470 - 79 69 47

XARUNTA SHAQADA
■ Willans Park 3, 2nd floor
Reception, tel 0470 - 433 00
Fax 0470 - 79 69 47

XARUNTA DIB U SOO CELINTA
■ Willans Park 3, 2nd floor
Reception, tel 0470 - 433 00
Fax 0470 - 79 69 47

TALLO BIXINTA MIISAANIYADA IYO DEYNTA
■ Västergatan 17 B
Reception, tel 0470 - 433 00, 414 90, 410 64
Fax 0470 - 79 69 33

Ciwaanka e-mailka
ekonomiskt.bistand@vaxjo.se
budgetradgivning@vaxjo.se

WARBIXIN KU SAABSAN CAAWIMAADA DHAQAALAHA

Växjö kommun
The Greenest City in Europe

Xaqa aad u leedahay caawimada dhaqaalaha, taageerid la tijaabiyay

Adeega buulshada waxa weyaan degmada dadka degan difaacooda.Shaqadu waxay ku nidaamsantahay sharciga adeega buulshada. Wuxu leeyahay in qof uu joogi karo degmada, qofkii aan si kale isku deberi karin, wuxu xaq u lahaan karaa caawimada dhaqaalaha.

Caawimada dhaqaaluhu waa tageerid la tijaabiyay oo waa ku sii meel gaadh, inta dhakhli kale la sugayo. Marka kulanka waxaad soo kaxaysan kartaa gacan yare ama wakiil. Waxaanad heli kartaa turjumaan.

Dakhli oo dhimaya

Warqada la socota waxaad ka arki kartaa intay qiimaha caawimado ay immika tahay, bishiiba.Inta u badan dakhliga oo dhan(marka la cashuuro) waa la xisaabinayaa oo waxay saamaynasaa caawimada dhaqaalaha. Waxa weyaan matalan:

- **mushahar**
- **lacagta shaqo-la'aanta**
- **lacagta gunndada bukaankas**
- **lacagta bukaanka**
- **lacagta gunnada ee dadka aan shaqayn karin**
- **lacagta gunnada waalidka**
- **kaalmada carruurta iyo ku kordhinta carruurta dheraadka ah**
- **lacagta cashooran**
- **tageerid hawl qabashada**
- **caawimada dacaytirka**
- **kaalmada kirada guriga**
- **deeqda waxbarshada**
- **taageerida waxbarashada**
- **lacagta hawlgabka carruurta**
- **lacagta hawlgabka pension**
- **taageerida masruufka dadka weync**

Kharashka kaa baxaya ay kaalmada dhaqaaluhu kaa kabayo?

- **raashin**
- **nadaafad**
- **joornaal iyo kharashka tv-iiga**
- **kharashka telefoonkatelefon-kostnader**
- **dhar iyo kabo**
- **kharashka fasaxa/maaweelada**
- **caymiska carruurta iyo dhalinyarta**

Waaxana lagaa caawin karaa dhaqaalaha kirada,laydhka iyo caymiska guriga iyo wixi kale ee kaa baxa.

Shaqo iyo camal qabashada

Haddii lagu siiyo caawimada shaqaalaha madama bilaa shaqo aad tahay, waa inaad iska diwaangelisaa xafiiska shaqada oo aad si firfircoon shaqo u raadsataa. Waxaad qaadanaysaa wixii tallaabo shaqo ama tallaabo waxbarasho laguu soo bandhigo. Maamulku wuxu la shaqeeyaa xafiiska shaqada markay noqoto shaqo,camal qabasho iyo tallaabada waxbarashada.

Hanti iyo isbedel dhaqaale

Waa kugu waajib in aad soo bandhigtid wixii hanti aad leedahay matalan baabuur, doon, baabuur guri, guri, guri fasax,lacag bangiga kuu taala, saami, lacagta hawlgabka iyo wixii la mid ah. Hantidaado waxay saameeynasaa xaqa aad kaalmada ku leedhay. Waa in aad na wargelisaa haddii isbadal ka yimaado dhaqaalahaaga iyo hantidaada, wakhtiga laguu ogalyahay caawimo dhaqaale.

Deyn, amaah iyo wixii la mid ah.

Caawimada dhaqaale looma ogalo in deyn ama ahaam lagu qaato. Markay xaalad deyn ay noqoto la xidhiid amaah dhiibaha ama shirkada deynta kugu leh. Waxaanad la xidhiidhi kartaa tallo bixiyaha miisaaniyada iyo deynta degmada. Waa muhiim in aad marka u horeysa aad bixisid kirada guriga, kirada leydhka, daryeelka carruurta iyo wixii kale ee muhiim idiin ah adiga iyo carruurtaada.

Ogalaansho in la baadho warbixintaada

Caawimada dhaqaaluhu waa baahi tijaabo ah oo waa in baadhitaan la sameeyo. Waa in aad xaqiijisaa dhaqaalaha ku soo gala iyo kaa baxa.

Xoghayahu xaq buu uu leeyahay in uu la xidhiidho Xafiiska caymiska,Xafiiska shaqo la'aanta, Hey'ada cashuuraha, Hey'ad kaalmaynta waxbarashada iyo Xafiiska xidhiidhka shaqada si loo hubiyo warixintaada. Arimaha caawimada oo dhan waxa lagu sameyaa baadhitaan, xaga kombiyuutirka, marka laga eego caymiska qaranka ah iyodiwaangelinta baabuurka. Haddii aadan ogalayn in lala xidhiidho meelaha qaarkood, waxay adkayn kartaa ama aan suurtagelinayn baadhitaanka.

Warbixino aan sax ahayn

Haddii aad dhiibtid warbixino khalad ah ama aan sheegin zixi isbadak kugu yimaada khoyaamo ayaa lagugu qabsan karaa waxayna noqon kartaa in dib aad u bixisid.

Noocyo kale oo ah caawimo

Xaqa caawimado maaha uun caawimo dhaqaale. Waxay noqon kartaa tageerooyin kala duwan-ama cawimo daryeel. Caawimadaas oo kale marka u horeysa adiga ayaanu kaala tashanaynaa.

Faylka qofka, diwaangelin iyo sir hayn

Wakhtiga xidhiidh aad la leedahay qaybta shaqada iyo daryeelka waxaanu ka qornaa joornaal faylka qofka. Waxaanad xaq u leedahay in aad akhrisid. Warbixinta adiga kugu saabsan waxa la gelinayaa diwaangelinta maclumaadka u taageerayo sharciga isticmaalka warbixnta dadka qaybta adeegga buulshada.

Warbinta la gelinayo diwaangelinta waxa ka mid ah: lambarka dhalashada, magac, ciwaan, meeqaanka qofka, tirada qoyska, qo'aan walba, dhaalaha baxa iyo soo gala iyo tirada caawimada dhaqaalaha.

In lagy siiyo caawimo dhaqaale, iyo in aad ku qorantahay qaybta shaqada iyo daryeelka, waa qarsoodi marka la eego sharciga qarsoodiga ah 7 cutubka 4 §.

Shaqaaluhu wuxu leeyahay sir hayn.